# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore

# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan iskuulka iyo waxbarashada aasaasiga ah




JYVÄSKYLÄ


NY

# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore

# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan iskuulka iyo waxbarashada aasaasiga ah


**Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore** **4**
- Wadashaqaynta waalidiinta 4
- Barashada afka hooyo ee ilmaha iyo Finnish-ka luqadda labaad 5
- Maalinta ilmaha ee barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore 6
- Cuntada 7
- Baxsashada bannaanka 7
- Bilaababashada iskuulka 7

**Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan iskuulka iyo waxbarashada aasaasiga ah** **8**
- Iskuulka 8
- Wada-shaqaynta guriga iyo iskuulka 10
- Barashada diyaarinta ee waxbarashada aasaasiga ah 10
- Luqadda labaad ee Finnish-ka ah - waxbarashada (S2-waxbarasho) 12
- Waxbarashada afka hooyo 12
- Cuntada iskuulka 13
- Safarka iskuulka 14
- Daryeelka ardayga 14
- Naadiga subaxa iyo galinka dambe ee Jälkkäri 15
- Qaabka maareynta maqnaanshaha ee waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Jyväskylä 16
- Tilmaamaha kooban ee kala qaybinta xogta maqnaanshaha 20
- Qaabka wax-ka-qabashada rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka iyo takoorka ee waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Jyväskylä 21

# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore

- Barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore waa qayb ka mid ah nidaamka waxbarasho ee Finland.
- Ilma kasta oo ka yar da'da iskuulka wuxuu xaq u leeyahay barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore.
- Barbaarinta carruurnimada waxaa lagu bixin karaa xarunta carruurta, daryeelka qoyska ama naadiga carruurta.
- Waxbarashada hore waxaa la bixiyaa hal sano ka hor bilaabashada iskuulka, waxaana lagu qaban karaa xarunta carruurta ama iskuulka.
- Shaqaalaha waa dad xirfad leh oo la tababaray.
- Waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa si wadajir ah uga heshiinaya muddada uu ilmaha ku jiro barbaarinta carruurnimada.
- Carruurta ku jirta barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore waxaa loo hayaa caymis shil oo uu bixiyo magaalada.
- Fasaxyada barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore (dayr, ciid, jiilaal, guga) waxay la jaanqaadaan fasaxyada iskuulka.
- Codsiga barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore waxaa lagu sameeyaa internet-ka ama iyadoo la isticmaalayo foomka laga helo xarunta carruurta.

# Wadashaqaynta waalidiinta

- Waalidiinta waxaan la shaqaynaynaa si loo taageero koritaanka, horumarka, barashada iyo nolol-wanaagga ilmaha.
- Waalidiinta waxaan la kulannaa maalin kasta marka ilmaha la keeno ama la kaxeeyo.
- Aadaalaha Edlevo waxaa laga isticmaali karaa in lagu qabsado saacadaha daryeelka, lagu sheegto maqnaanshaha, ama lagu akhriyo ogeysiisyada.
- Wadahadallada horumarinta ilmaha, waalidiinta iyo shaqaaluhu waxay u sameeyaan qorshe shaqsiyeed ilmaha.
- Haddii loo baahdo, turjubaan ama la-hawlgalayaal kale ayaa ka qeyb gali kara.
- Shaqaalaha barbaarinta carruurnimada ayaa dalban kara turjubaan.
- Adeegyada barbaarinta carruurnimada ayaa bixiya qarashka turjumaanka.
- Shaqaalaha iyo hay'adaha ka shaqeeya barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore waxay ku waajib yihiin ilaalinta xogta qarsoodiga ah.
- Shaqaaluhu waxay mas'uul ka yihiin in ay siiyaan iskuulka cusub xogaha




muhiimka ah ee khuseeya ilmaha.
- Haddii amniga ama caafimaadka ilmaha halis galo, sharcigu wuxuu shaqaalaha farayaa inay arrintaas ka warbixiyaan.

# Barashada afka hooyo ee ilmaha iyo Finnish-ka luqadda labaad

- Barashada afka hooyo waa mas'uuliyadda waalidiinta.
- Barashada afka hooyo waxay ka caawisaa ilmaha inuu barto luqado kale.
- Haddii ilmuhu si joogto ah uga qayb qaato barbaarinta carruurnimada ama waxbarashada hore, wuxuu baranayaa Finnish-ka hadal iyo faham ahaan.
- Hawlaha kala duwan ee gudaha iyo bannaanka ka dhaca waxay siiyaan ilmaha fursad uu ku barto Finnish-ka.
- Ilmuhu wuxuu sidoo kale luqadda ku baranayaa isagoo la ciyaaraya asxaabtiisa.
- Ilmaha ka qayb qaata waxbarashada hore wuxuu heli karaa barashada afka hooyo. Shardi ahaan, waa in koox barasho oo afkaas ah jirtaa, waalidiintuna ay ka mas'uul yihiin gaadiidka ilmaha. Kooxda barashada ayaa isugu imaan karta xaafad kale.

# Maalinta ilmaha ee barbaarinta carruurnimada iyo waxbarashada hore

- Ilmuhu maalin kasta wuu ciyaaraa, cunaa, nastaa iyo bannaanka u baxaa.
- Hawlaha gudaha iyo bannaanka ka dhaca waxay ka kooban yihiin ciyaar, isboorti, muusig, safarro iyo farsamada gacanta.
- Ilmuhu wuxuu wax ku baranayaa ciyaar ahaan.
- Xitaa carruurta yaryar waxay bartaan daryeelka naftooda, sida cunto qaadashada ama labiska.
- Da’da iyo heerka horumarka ilmaha ayaa la tixgeliyaa, waxaana garab taagan qof weyn oo caawiya.
- Ilmuhu wuxuu bartaa sida loola dhaqmo dadka kale ee kooxda, iyo ixtiraamka asxaabta.
- Waxbarashada hore waxay ilmaha baraysaa xarfaha iyo tirooyinka, laakiin lama baro akhris rasmi ah mana laga rabo.

”Ilmuhu wuxuu wax ku baranayaa ciyaar ahaan.”



# Cuntada

- Maalinta barbaarinta carruurnimada waxaa ku jira quraac, qado iyo casariye.
- Cuntada waa bilaash.
- Shaqaaluhu waxay ilmaha ku dhiirrigeliyaan inay tijaabiyaan cuntooyin cusub.
- Lama qasbo inay cunto cunaan, mar walbana way ku biisan karaan.
- Liiska cuntada ee xarumaha carruurta iyo iskuulka waxaa laga heli karaa xarunta ama bogga internet-ka.
- Liiska cuntada waxaa lagu diyaariyaa iyadoo la raacayo talooyinka nafaqada ee carruurta.
- Cuntooyinka la xiriira caafimaadka, diinta ama aragtida waa la tixgeliyaa.
- Ilmuhu waa inuu haystaa warqad caafimaad oo caddeyneysa xasaasiyad ama cuntada gaarka ah.
- Haddii cuntooyinka ay salka ku hayaan aragti, warqad caddayn ah looma baahna. Ogaysiis uu waalidku ku sameeyo foomka cuntada gaarka ah ayaa ku filan.

# Baxsashada bannaanka

- Barbaarinta carruurnimada maalin kasta ayay bannaanka u baxaan.
- Xitaa haddii roob da'o ama heerkulku hooseeyo ilaa -15°C, carruurta waxaa loo oggol yahay bannaanka iyadoo da'dooda la tixgelinayo.
- Ilmaha waa inuu wataa dhar cimilada ku habboon iyo dhar dheeraad ah.
- Waxay booqan karaan barxado, kaymaha, goobaha barafka, garoonka ciyaaraha ama maktabadda.
- Barxadda xanaanada, kaynta ama garoonka ciyaaraha, carruurtu waxay ka qaybqaataan waxqabadyo kala duwan, sida waxbarashada isboortiska, xisaabta ama taswiiridda. Carruurtu sidoo kale waxay ku ciyaaraan kaynta.

# Bilaabashada iskuulka

- Waalidiintu waxay ilmaha ka diiwaangaliyaan iskuulka bisha Janaayo ee sanadka uu dhameynayo waxbarashada hore.
- Waajibaadka waxbarashada wuxuu bilaabmaa bisha Agoosto marka uu ilmaha gaaro 7 sano.
- Ilmuhu wuxuu ka bilaabaa waxbarashada aasaasiga ah guud ahaan iskuulka ku yaal xaafaddiisa.

# Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan iskuulka iyo waxbarashada aasaasiga ah

- Magaalada Jyväskylä waxay bixisaa waxbarashada aasaasiga ah iyadoo la raacayo sharciga waxbarashada aasaasiga ah ee Finland.
- Finland waxbarashadu waa qasab.
- Ardayga waxaa ku waajib ah inuu iskuulka dhigto haddii uu degmo ku leeyahay Finland.
- Waajibka masuulka ayaa ah inuu hubiyo in ilmuhu dhammeeyo waxbarashada aasaasiga ah.
- Ilmuhu wuxuu bilaabaa fasalka koowaad sanadka uu buuxiyo 7.
- Iskuulka hoose-dhexe wuxuu qaataa 9 sano.
- Waxbarashada qasabka ah waxay dhamaanaysaa sanadka uu qofku buuxsado 18 sano.
- Waxbarashada aasaasiga ah waa lacag la'aan.
- Qalabka waxbarashadu waa bilaash.
- Luuqadda wax lagu barayaa waa Finnish.
- Ardaygu wuxuu inta badan aadaa iskuulka ugu dhow meesha uu deggan yahay.
- Haddii iskuulka deegaanku buuxsamo, ardayga waxaa lagu meelayn doonaa iskuul kale oo ammaan ah oo masaafo gaaban u jira.
- Waxbarashada iskuulka waxay raacdaa manhajka.
- Manhajku waxa uu hagayaa waxa lagu barto iskuulka iyo waxa ay yihiin yoolalka waxbarashadu.
- Barashada luqadda Ingiriisiga waxaa lagu bixiyaa laba iskuul. Luuqadaha wax lagu bartaa waa Ingiriisi iyo Finnish.
- Waxbarashada luqadda Iswidhishka waxa lagu bixiyaa hal iskuul. Luuqadda wax lagu bartaa waa iswidhish.
- Fasalada kale ee gaarka ah waxaa ka mid ah fasalada muusiga iyo jir-dhiska. Laba iskuul ayuu ku yaal fasalka muusiga. Laba iskuul ayuu ku yaal fasalka jir-dhiska.

# Iskuulka

- Ardaygu wuxuu u baahan yahay boorsada dhabarka marka uu iskuulka yimaado.
- Ardaygu wuxuu iskuulka ka helaa buugaag iyo qalabka wax lagu qoro.



- Ardaygu wuxuu u baahan yahay qalin iyo tirtire si uu uga shaqeeyo layliyada guriga.
- Ardaygu wuxuu ka helayaa  iskuulka jadwalka.
- Ardaygu wuxuu raacaa jadwalka maalinta iskuulka.
- Jadwalku wuxuu muujinayaa wakhtiga iskuulka bilaabmayo iyo dhammaanayo.
- Jadwalku wuxuu muujinayaa maadooyinka la baranayo maalin dugsiyeedka.
- Waa in aad joogtid iskuulka marka uu xiisadda ugu horreeya bilaabmo.
- Waalidku uma baahna inuu ardayga u raaco iskuulka ama uu iska diiwaan geliyo macallinka.
- Mas'uulka ayaa ardayga yar u kaxeyn kara bannaanka iskuulka subaxdii haddii uu rabo.
- Ardaygu wuxuu ku sugayaa bannaanka iskuulka maalinta iskuulka bilaabmayo. Gambaleelka iskuulka ayaa garaaca marka fasalka bilaabmo.
- Ardaygu kama bixi karo iskuulka badhtamaha maalinta fasax la'aan.
- Ardaydu dibadda iskuulka ayay u baxaan xilliga bareegga. Ardaydu waxay u baahan yihiin dhar iyo kabo ku habboon cimilada.
- Xiisadaha jir-dhiska waxay ka dhacaan gudaha ama dibadda. Xiisadaha gudaha ardaygu wuxuu u baahan yahay dhar beddel ah: surwaal gaaban, funaanad iyo tuwaal. Casharrada dibadda ardaygu wuxuu u baahan yahay dhar iyo kabo ku habboon cimilada iyo jimicsiga.
- Dugsigu wuxuu taageeraa horumarka afka, barashada iyo ka qaybgalka iskuulka.
- Dugsigu waxa uu leeyahay xeerar nidaamsan.
- Qofna lama cagajugleyn karo.
- Ardaydu waxay ku jiraan caymis maalinta iskuulka oo dhan.
- Haddii ardaygu uu waxyeeleeyo hantida iskuulka, mas'uuliyiinta ayaa bedeli doona alaabta jaban.
- Wakhtiyada shaqada iyo fasaxyada iskuulka.

# Wada-shaqaynta guriga iyo iskuulka

- Mas'uulka shaqadiisu waa inuu hubiyo in ilmuhu iskuulka dhigto.
- Iskuulku wuxuu ku taageeraa waalidka shaqada tarbiyadda.
- Labada mas'uulba waxay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaadka ku saabsan waxbarashada ilmahooda.
- Isgaarsiinta guriga iyo iskuulka badanaa waxay ka dhacdaa nidaamka Wilma.
- Tilmaamaha Wilma waxaa laga helaa xafiiska iskuulka ee iskuulka ilmaha.
- Iskuulka wuxuu waalidka ugu yeeraa shirarka ardayda iyo waalidiinta.
- Mas'uulka ayaa iskuulka la socodsiiya arrimaha caafimaadka ee la xiriira badbaadada ardayga.
- Haddii ardaygu bukoobo, waa in sida ugu dhaqsaha badan loogu soo sheego iskuulka.
- Mas'uulka ardayga ayaa ka warbixinaya maqnaanshaha xanuunka ee ardayga isagoo adeegsanaya Wilma, wicitaan ama fariin qoraaleed.
- Mas'uulka ardayga waa inuu codsadaa fasaxyada kale isagoo adeegsanaya Wilma. Ardaygu isagu ma consankaro maqnaanshihiisa.
- Macallinku wuu siin karaa fasax muddo ah 1 ilaa 5 maalmood.
- Maamulaha ayaa oggolaan kara fasaxyada ka badan 5 maalmood.
- Jyväskylä waxa ay isticmaashaa qaabka maqnaanshaha, kaas oo laga heli karo dhammaadka buug-yarahan.
- Haddii ardaygu leeyahay maqnaanshiyaal badan, iskuulku wuxuu la xiriirayaa mas'uulka ardayga.
- Iskuulka waxaa laga hortagaa dhibaataynta. Mas'uulka ardayga wuxuu la socodsiinayaa iskuulka haddii ardaygu guriga ka sheego dhib ama dhibaatayn uu la kulmay.
- Qaabka wax looga qabanayo rabshadaha, dhibaataynta iyo takooridda waxaa laga helayaa dhammaadka buug-yarahan.

# Barashada diyaarinta ee waxbarashada aasaasiga ah

- Haddii ardaygu uusan wali aqoon afka Finnish-ka, wuxuu ka qaybgalayaa barashada diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah.
- Barashadan diyaarinta waxaa loogu talagalay ardayda da'doodu tahay 6 ilaa 16 sano.
- Ardaygu wuxuu bilaabi karaa barashada diyaarinta xilli kasta oo sanadka waxbarashada ah.
- Barashada diyaarinta lagama helayo dhammaan iskuullada.



- Barashada diyaarinta waxay leedahay manhaj u gaar ah.
- Ardayga waxaa loo sameeyaa barnaamij waxbarasho oo gaar ah iyadoo lala kaashanayo mas'uulka ardayga.
- Ardaygu wuxuu baranayaa afka Finnish-ka iyo qodobo muhiim ah oo ka mid ah maadooyinka kale.
- Haddii ay suurtagal tahay, ardaygu wuxuu ka qaybgelayaa casharro ka mid ah waxbarashada aasaasiga ah ee afka Finnish-ka lagu dhigto.
- Tani waxay ka caawinaysaa ardayga la qabsiga bulshada Finnish-ka.
- Barashada diyaarinta waxay qaadanaysaa qiyaastii hal sano.
- Marka uu dhamaado barashada diyaarinta, ardaygu wuxuu u wareegayaa iskuulkiisa agagaarka ee waxbarashada aasaasiga ah ee afka Finnish-ka lagu dhigto.
- Carruurta da'doodu u dhaxayso 7 ilaa 10 sano waxay haystaan 25 saacadood oo waxbarasho ah toddobaadkii.
- Carruurta da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 15 sano waxay haystaan 26 saacadood oo waxbarasho ah toddobaadkii.

# Luqadda labaad ee Finnish-ka ah - waxbarashada (S2-waxbarasho)

- Marka uu ardaygu dhammeeyo waxbarashada diyaarinta, wuxuu u wareegayaa iskuulka agagaarka ee waxbarashada aasaasiga ah ee afka Finnish-ka lagu dhigto.
- Barashada luqadda labaad iyo suugaanta ee Finnish-ka (S2) waxay u tahay ardayda baranaya afka Finnish-ka.
- Barashada S2 waxaa la beddeli karaa marka afka ardaygu horumar gaadho oo ku filan.
- Mas'uulka ardayga ayaa go'aaminaya barashada.
- S2 waxaa laga helaa dhammaan iskuullada.
- S2 waxaa laga helaa dhammaan maadooyinka.
- S2 ma aha waxbarasho gaar ah ama waxbarasho taageero ah.
- S2 waxay la qiimeeysan tahay barashada afka Finnish-ka hooyo ahaan.

# Waxbarashada afka hooyo

- Waxbarashada afka hooyo waxaa loogu talagalay caruurta iyo dhalinyarada da'doodu tahay 6 ilaa 18 sano oo afkoodu yahay mid kale oo aan ahayn Finnish-ka ama mid ka mid ah luqadaha qoyska.
- Waxbarashada waxaa la isku dayayaa in la diyaariyo haddii ay jiraan ugu yaraan 4 arday oo isla luqad ah iyo haddii la helo macallin luqaddaas yaqaan.
- Haddii luqadu ka mid tahay luqadaha laga tirada badan yahay ee rasmiga ah ee Finland (luqadda dhegoolayaasha Finnish-ka, luqadaha kala duwan ee Saame, ama Romani/Kaaleen), waxaa loo baahan yahay ugu yaraan 2 arday.
- Waxbarashadu waa ikhtiyaari.
- Marka la is diiwaangeliyo, ardaygu waa inuu si joogto ah uga qeyb galo waxbarashada.
- Waxbarashadu waa bilaash.
- Waxbarashada afka hooyo waxaa la helaa labo saacadood toddobaadkii.
- Casharada waxaa la bixiyaa marka uu dhamaado maalinta iskuulka.
- Kooxda waxbarashada afka hooyo waxay dhici kartaa in lagu qabto iskuul kale.
- Mas'uulka ardayga ayaa ka masuul ah gaadiidka. Ardaygu wuxuu heli karaa tigidh bas si uu uga qayb galo waxbarashada afka hooyo.
- Isdiiwaangelinta waxbarashada afka hooyo waxaa la sameeyaa xilliga gu'ga, bisha Abriil ama May.




- Haddii aan la is diiwaangelin, ma suurtagalayso ka qeybgalka waxbarashada.
- Haddii sanadka waxbarashada dhexdiisa la is diiwaangeliyo, waxaa la buuxiyaa foom warqad ah.
- Waxbarashadan waxaa loogu talagalay in sanad kasta la iska diiwaangeliyo.
- Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa maamulaha adeegga Pia Bärlund, pia.barlund@jyvaskyla.fi

# Cuntada iskuulka

- Ardaygu wuxuu iskuulka ka helaa qadada bilaashka ah. Iskuullada quraac ma bixiyaan.
- Iskuulka waxaa laga helaa cuntooyin Finnish ah.
- Iskuulka waxaa la raacaa habdhaqanka quudinta Finnish-ka.
- Ardaygu wuxuu isticmaalayaa fargeeto iyo mindi marka uu cuntaynayo. Cuntada gacmaha laguma cuno.
- Mas'uulka ardayga waa inuu la socodsiiyo jikada iskuulka haddii ardaygu leeyahay cunto gaar ah ama xasaasiyad cunto oo foomkan gaarka ah lagu buuxiyo.
- Ardaygu wuxuu u baahan yahay warqad cadeyn ah oo ka timaada dhakhtar ama nafaqeeyaha haddii uu leeyahay cunto gaar ah ama xasaasiyad. Warqad ka timaada kalkaaliye caafimaad waa la aqbalaa haddii ay ku salaysan tahay ogaanshaha dhakhtarka.
- Warqad cadeyn ah looma baahna haddii cuntadu tahay mid aan lahayn laktoos, cunno vegan ama cunno khudradeed ah.
- Warqad looma baahna haddii cuntadu ku salaysan tahay aragti ama diimeed. Markaa waxaa ku filan foomka cuntada gaarka ah.
- Iskuullada qaarkood waxaa laga iibsan karaa cunto fudud.
- Iskuulka waxaad usoo qaadan kartaa cunto fudud oo caafimaad leh.

# Safarka iskuulka

- Iskuulka waxaa loo safraa si ammaan ah iyadoo la raacayo xeerarka wadooyinka.
- Safarada gaaban waxaa inta badan lagu tagaa lug ama baaskiil.
- Waxaa wanaagsan in safarka iskuulka lala tababarto ardayga.
- Jyväskylä safarka iskuulka waxaa laga magdhabi karaa keliya iskuulka koowaad ee maamulka waxbarashada tilmaamay.
- Ardayda fasalka 1–2 wuxuu heli karaa gaadiid iskuul oo bilaash ah haddii safarka iskuulka uu ka badan yahay 3.5 kiiloo mitir.
- Ardayda fasalka 3–9 wuxuu heli karaa gaadiid iskuul oo bilaash ah haddii safarka iskuulka uu ka badan yahay 5 kiiloo mitir.
- Ma jiro baahi codsi oo loogu baahan yahay gaadiidka iskuulka.
- Marka masaafada la cayimay ay dhaafto, iskuulka ayaa si toos ah u diyaariya adeegga gaadiidka.
- Ardaygu wuxuu iskuulka ka helaa kaarka baska.
- Haddii ardaygu leeyahay cudur ama naafo oo aanu iskiis iskuulka ku tagi karin, waxaa loo baahan yahay codsi gaar ah. Ardaygu wuxuu u baahan yahay warqad cadeyn ah oo ka timaada dhakhtarka.
- Haddii ardaygu helo gaadiid taxi ah, mas'uuliyiintu waxay adeegsanayaan aadaalaha MunSchool.

# Daryeelka ardayga

- Daryeelka ardayga wuxuu taageeraa caafimaadka iyo wanaagga ardayga.
- Adeegyada daryeelka ardayga waa u bilaash.
- Xiriirka adeegyada daryeelka ardayga waxaa laga helaa cinwaanka iskuulka.
- Kalkaaliye caafimaad iyo dhakhtar iskuul ayaa la socda caafimaadka ardayga.
- Ardayga waxaa loo yeeraa baaritaan caafimaad oo dhameystiran fasalada 1-aad, 5-aad iyo 8-aad.
- Baaritaanka dhameystiran waxaa ka mid ah kalkaaliye iyo dhakhtar.
- Baaritaankan waxaa sidoo kale loo yeeraa waalidiinta labadooda.
- Ardayga waxaa sidoo kale loo yeeraa baaritaanka caafimaadka ilkaha fasalada 1-aad, 5-aad iyo 8-aad.
- Shaqaalaha bulshada iskuulka wuxuu caawiyaa ardayga haddii uu leeyahay walwal ama dhibaato.
- Iskuulku wuxuu leeyahay cilmi-nafsi yaqaan oo qiimeeya baahiyaha taageerada.

- Iskuulku wuxuu leeyahay wakiilo taageero oo taageera wanaaggа ardayga. Iskuulku wuxuu leeyahay hage taageera barbaarinta ardayga.
- Iskuulka waxaa sidoo kale ka shaqeeya shaqaale dhalinyaro oo taageera koritaanka iyo wanaagga dhalinyarada.

# Naadiga subaxa iyo galinka dambe ee Jälkkäri

- Barnaamijkan wuxuu u furan yahay ardayda fasalka 1-aad iyo 2-aad.
- Ardayda fasalada 1–5 ee heysta go'aan taageero gaar ah ayaa sidoo kale ka qeyb qaadan kara.
- Naadigu waa lacag.
- Waxaa naadiga laga helaa iskuullada Jyväskylä subixii iyo galabtii.
- Barnaamijka galabta wuxuu socdaa maalmaha iskuulka saacadda 12:00–17:00.
- Barnaamijka subaxda waxaa la qabtaa haddii arday ku filan isdiiwaangaliso.
- Naadiga waxaa loo baahan yahay codsi gaar ah inaad buuxiso.
- Haddii ardaygu yahay naafo, waxaa la weydiin karaa xaqa uu u leeyahay barnaamijka Vertti. Weydii iskuulka.



# Qaabka maareynta maqnaanshaha ee waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Jyväskylä

Mas'uulka waxbarashada waxaa uu ka hortagaa maqnaanshaha ardayga isla markaana si nidaamsan ula socdaa, ku farageliyaa una dabagalaa. Waxaa kale oo yimid in mas'uulku uu ogeysiiyo waalidiinta ama mas'uulka sharciga ah ee ardayga haddii ay dhacdo maqnaasho aan la oggolayn. (POL 26 §)

Carruurta sida joogtada ah u deggan Finland waa ku waajib in ay waxbartaan. Waalidku wuxuu leeyahay waajib sharci ah in uu hubiyo in ardaygu dhammeeyo waajibaadka waxbarashada. (OVL 2 § & 9 §)

Maqnaanshaha ardayda waxaa la tixgeliyaa dhamaan sannadka waxbarashada, xitaa maqnaanshaha la oggolyahay. Maqnaanshaha waxaa si nidaamsan loo daba-galaa; kooxdiisa wadajirka ah ee daryeelka ardayda ayaa afar jeer sannadka ka qabata.

## 1. Ka hortagga maqnaanshaha

### Hawlgallo taageera nolol-wanaagga, ka-qaybgalka iyo midnimada bulshada iskuulka

- Xoojin xirfadaha dareenka, amniga iyo is-dhexgalka ardayda iyo shaqaalaha.
- Shaqaaluhu wuxuu si shaqsiyeed ula kulmaa ardayda si uu u taageero midnimadooda iyo joogitaanka iskuulka.
- Shaqaaluhu wuxuu taageeraa is-dhexgalka kooxaha iyo xiriirada iskuulka si loo yareeyo kelinimada.
- Bulshada iskuulka oo dhan waxay ka shaqeysaa abuurista jawiga waxbarashada oo ammaan ah, iyadoo ka hortagaysa rabshad, cagajuglayn, xadgudub iyo takoorka.
- Shaqaaluhu wuxuu dhisaa wada-shaqaynta firfircoon oo u dhaxaysa guriga iyo iskuulka.
- Maqnaanshaha ardayda waxaa si nidaamsan loogu daba-galaa heer shaqsi iyo koox, qayb ka ah qorshaha wadajirka ah ee daryeelka ardayda.

## 2. Faragelin degdeg ah oo lala sameeyo ardayga iyo waalidiinta

- Isbedello aan caadi ahayn oo ku yimaada hab-dhaqanka ardayga.
- Diidmada imaatinka iskuulka.
- Daahitaanno soo noqnoqda.



- Bixista xiisadda inta lagu jiro ama maalinta iskuulka.
- Ardaygu iskuulka ayuu joogaa, laakiin fasalka kuma jiro.
- Maqnaansho aan la oggolayn.
- Maqnaansho aan lahayn sharaxaad ama shuruudaha aan buuxinayn.
- Maqnaanshaha soo noqnoqda ee isla mawduuca ama maalmaha qaarkood ee toddobaadka.
- Maqnaansho joogto ah iyo muddo dheer.

## 3. Faragelin hore

- Macallinku wuxuu baaritaan kaga sameeyaa maqnaanshaha isagoo kala hadlayo ardayga iyo waalidka.
- Macallinku wuxuu daba-galaa horumarka waxbarashada, waxuu aqoonsadaa dhibaatooyinka waxbarashada, wuxuuna qiimeeyaa baahida taageerada.
- Macallinku wuxuu la tashadaa macallinka waxbarashada gaarka ah ee heerka hoose iyo adeegyada taageerada ardayga haddii ay jiraan welwel ku saabsan nolol-wanaagga, waxbarashada, ama imaanshaha iskuulka ee ardayga.
- Macallinku wuxuu ardayga iyo waalidkaba la qorsheeyaa tallaabooyinka taageerada iyo waqtiga dib-u-eegista.
- Maqnaanshaha aan la oggolayn ama aan la sharixin waa in isla markiiba wax laga qabtaa.

## 4. Tallaabooyin la beegsaday

- Macallinku wuxuu la xiriiraa waalidiinta oo codsadaa ogolaansho si loo qaban-qaabiyo koox xirfadlayaal badan leh oo ardayga taageera.
- Macallinku wuxuu la tashadaa macallinka gaarka ah ama adeegyada daryeelka ardayda haddii loo baahdo.
- Haddii loo arko in ay muhiim tahay waxbarashada iyo nolol-wanaagga ardayga, macallinku wuxuu abaabulaa kulanka kooxahaas.
- Kulanka waxaa lagu ogaanayaa sababaha maqnaanshaha, lana hubiyaa heerka taageerada waxbarashada waxaana loo dejinayaa ujeeddooyin iyo tallaabooyin ay qaadanayaan iskuulka iyo guriga.
- Waxaa la qoondeeyaa qof mas'uul ah iyo waqtiga dib-u-eegista xigta.
- Haddii aan kulankaas la qaban, macallinku wuxuu la heshiinayaa taageerooyinka iyo dabagalka ardayga iyo waalidka.
- Waxaa sidoo kale la qorsheeyaa tallaabooyin bulshada dhexdeeda.

## 5. Tallaabooyin adag

- Taageerada shaqsiyeed ee ardayga waa la xoojinayaa.
- Haddii loo baahdo, waxaa la la xiriiriyaa hay'ado dibadda ka ah.
- Kooxda isugu jirta xirfadlayaal badan, macallimiinta iyo adeegyada daryeelka ardayda waxay la heshiiyaan ardayga iyo waalidiintiisa sidii si qoto dheer loo baarilahaa sababaha maqnaanshaha.
- Heerka taageerada waxbarashada waa la hubiyaa, waxaana la qorsheeyaa taageerooyin gaar ah sida hab maamul wada-jir ah ama hab waxbaro oo gaar ah.
- Qof mas'uul ah ayaa ka mas'uul ah dabagalka iyo hirgelinta nidaamka.
- Macallinku haddii loo baahdo, wuxuu sameyn karaa 1) wargelin sharci (sida sharciga daryeelka bulshada) si loo qiimeeyo baahida taageerada ama 2) wargelin daryeelka carruurta ah.

## 6. Haddii maqnaanshaha uu sii socdo

- Wada-shaqayn badan oo dhow ayaa la xoojinayaa.
- Waxaa laga fiirsanayaa qaab-dhismeedyo waxbarashada oo gaarka ah sida ku qoran POL 18 §, meelo gaar ah oo xoogga la saarayo, VSOP iyo qaybinta shaqada fasalka.
- Qofka mas'uulka ah waxa uu u taageeraa ku soo laabashada ardayga si qorshaysan.




## Waxaa loo xisaabinayaa maqnaanshaha boqolley ahaan iyo saacado ahaan sannadka waxbarashada ee Jyväskylä

| Heerka fasalka | 5 % maqnaanshaha | 10 % maqnaanshaha | 15 % maqnaanshaha | 20 % maqnaanshaha |
|---|---|---|---|---|
| fasalka 1-aad ilaa 2-aad | 38 saacadood | 76 saacadood | 114 saacadood | 152 saacadood |
| fasalka 3-aad | 42 saacadood | 84 saacadood | 125 saacadood | 167 saacadood |
| fasalka 4-aad | 46 saacadood | 91 saacadood | 137 saacadood | 182 saacadood |
| fasalka 5-aad ilaa 6-aad | 48 saacadood | 95 saacadood | 143 saacadood | 190 saacadood |
| fasalka 7-aad ilaa 9-aad | 57 saacadood | 114 saacadood | 171 saacadood | 228 saacadood |

**Maqnaanshaha 10% ayaa la muujiyay inay halis ku tahay nolol-wanaagga iyo waxbarashada.**

# Tilmaamaha kooban ee kala qaybinta xogta maqnaanshaha

Talada wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka

- ## U maqnaanshiyaha sababo caafimad darro ah

  Ardaygu si jireed ayuu iskuulka uga maqnaan karaa (sabab la xiriirta bukaan-socod jireed iyo/ama daryeel nafsaani ama caafimaad, tusaale ahaan booqasho dhakhtar ilko ah, daaweyn, ama qaliin). Xog-ururintaas waxaa samayn kara waalidka ama macallinka iyadoo lagu saleynayo wargelin ka timid waalidka.

- ## Fasax hore loo codsaday

  Maqnaansho hore loo codsaday oo macnaheedu yahay in waalidku codsaday ogolaansho, iyadoo laga yaabo in ay ku jiraan hal xiisad ama maalin iskuul, safar fasax, hawl kale oo xirfad ama maqnaan waalid fog. Macallinku wuxuu diiwaan galinayaa maqnaanshaha iyadoo lagu saleynayo wargelin ama codsi ka yimid waalidka.

- ## Maqnaansho ka baxsan oo la wargeliyey

  Waxaa loo adeegsanayaa kaliya marka maqnaanshahu uusan ku dhammaanaynin qaybaha kale (tusaale, POL 36 §, karantiin is-maalgelin ah, xaalad lama filaan ah oo qoyska ah). Waxaa qora waalidka ama macallinka.

- ## Maqnaansho aan la ogolayn, la xaliyey

  Maqnaansho aan la oggolayn oo la xaliyey (tusaale ahaan: maqnaansho aan la oggolaan ama dib-dhac xiisadda ka badan hal saacadood).

- ## Maqnaansho aan la ogeyn

  Iskuulku ma haysto macluumaad ku saabsan sababta ilmaha uu u maqnaa. Macallinka ama waalidka ayaa baari kara maqnaanshaha wuxuuna bedeli karaa qaybta uu ku qoran yahay.

- ## Shaqooyinka kale ee iskuulka, jooga

  Imuhu wuxuu jireed ahaan ku jiraa iskuulka, laakiin si ogolaansho leh wuu ka maqan yahay xiisadda (tusaale ahaan: adeegyada daryeelka ardayga, hawlaha golaha ardayda, taageeradaha kale). **Ma noqonayso maqnaansho la tiriyo.**

- ## Waxbarasho meel kale

  Ardaygu wuu ka maqnaan karaa iskuulka haddii uu joogo tusaale ahaan iskool qaliin/bukaan socod ah, ama uu sameynayo jadwal iskool oo gaaban (POL 18 §). **Ma noqonayso maqnaansho la tiriyo.**

- ## Dib-u-dhac

  Dib-u-dhac ka yar hal xiisad (in ka yar hal saacad) ayaa lagu qoraa foomka saacadaha (daqiiqado ahaan). **Ma noqonayso maqnaansho la tiriyo.**

# Qaabka wax-ka-qabashada rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka iyo takoorka ee waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Jyväskylä

Qof kasta oo ka qaybqaata waxbarashada wuxuu xaq u leeyahay deegaan waxbarasho oo ammaan ah. (Pol 29 §)
Qodobka 25§ ee xeerka daryeelka carruurta - waajibka in laga sameeyo wargelin daryeelka carruurta iyo wargelin dambiyada.

## Ka hortagga iyo wax-ka-qabashada hore

### 1. Qorsheynta iyo nidaamsanaanta

- Iskuul kasta waxaa lagu aasaasaa koox ama waxaa loo magacaabaa qof mas'uul ah oo isku dubarida kuna shaqeeya ka hortagga rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka iyo takoorka. Mas'uulkaasi waa xubinta kooxda daryeelka ardayda ee wadajirka ah.
- Qorshaha sannad-dugsiyeedka iskuulka waxaa lagu qoraa mas'uuliyiinta arrimahaas, ujeeddooyinka, qaababka wax-qabadka, iyo qiimeynta dhammaadka xilliga.
- Xeerarka iskuulka, tilmaamaha dabeecadda, iyo qorshayaasha sinnaanta iyo fursad siman waxaa lala wadaagaa ardayda, waalidiinta iyo shaqaalaha.
- Qorshaha sinnaanta iyo fursad siman waxaa lagu qoraa siyaasad cad oo lagu dhisayo jawi is-ixtiraam iyo is-qaddarin leh.
- Kooxda wadajirka ah ee daryeelka ardayda waxay si qorsheysan u hormarisaa wanaagga iyo amniga bulshada iskuulka.

### 2. Xoojinta midnimada bulshada iskuulka

- Xirfadaha dareenka, amniga, iyo is-dhexgalka waxaa lagu barto qayb ka mid ah qorshaha sannadeedka caafimaadka iyo daryeelka ardayda iyo xaaladaha maalinlaha ah.
- Shaqaaluhu si ula kac ah ayuu u taageeraa is-dhexgalka kooxaha iyo xiriirka dhexdooda si loo yareeyo kelinimada.
- Bulshada iskuulka waxay dhiirrigelisaa aragtida wanaagsan, is-dhexgal togan iyo dhiirrigelinta jawaab celin togan.

### 3. Iskuul ammaan ah

- Rabshad nooc kasta ha ahaatee lama aqbalo. Shaqaalaha iskuulka si

nidaamsan ayay uga falceliyaan habdhaqan kasta oo aan habboonayn.
- Maamulaha iskuulka ayaa si qorsheysan hoggaamiya hawlaha ka hortagga rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka iyo takoorka.
- Shaqaaluhu waxay helaan tababar ku saabsan habka wax-ka-qabashada rabshadda.
- Shaqaaluhu way garanayaan sababaha halista ah ee keena cagajuglaynta iyo calaamadaha muujinaya in arday la dhibaateynta.
- Shaqaaluhu waxay ardayda siiyaan casharro iyo maalmo u gaar ah mawduucyada la xiriira arrimahan.

### 4. Dhaqan iskuuleed ku saleysan ka-qaybgal

- Ardaydu way fahmayaan rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka iyo takoorka, waxayna baranayaan sida loo aqoonsado loogana falceliyo.
- Ardayda waxaa lagu dhiirrigeliyaa in ay warbixin siiyaan shaqaalaha marka ay la kulmaan rabshad iyo in ay si firfircoon uga falceliyaan.
- Ardayda iyo waalidiinta waxaa laga qeybgelinayaa dhismaha dhaqan iskuuleed ammaan ah iyo horumarinta wadajirka.
- Waalidiinta waxaa la siiyaa warbixin iyo fursad ay kaga doodaan qorshaha iskuulku u dejiyey arrimahan.

# Wax-ka-qabashada

- Shaqaalaha iskuulka waa in ay mar kasta ka falceliyaan rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka ama takoorka ay arkaan ama laga wargeliyo. Fiiro gaar ah.! Xaaladaha rabshad ama hanjabaad degdeg ah waxaa lagu dhaqmaa tilmaamo gaar ah.
- Shaqaaluhu marka hore waxay la hadlaan dhibbanaha rabshadda, cagajuglaynta, xadgudubka ama takoorka kadibna la hadlaan dhinacyada kale.
- Gunaanadka baaritaanka, go'aannada la gaaray iyo tallaabooyinka xiga waxaa lagu qoraa nidaamka elektaroonigga ah.
- Waalidiinta waxaa lagu wargeliyaa wixii dhacay isla maalintaas.
- Haddii dhacdadu u muuqato in ay noqon karto dembi, waxaa lala xiriiraa booliiska waxaana la sameeyaa wargelin daryeelka carruurta ama mid iskudhafan (booliiska Ankkuri, daryeelka carruurta, hay'adda dhexdhexaadinta).
- Shaqaaluhu wuxuu xoojiyaa xiriirka la leh waalidiinta, wuxuuna ku martiqaadaa shir.
- Haddii rabshad ay dhacdo inta lagu jiro safarka iskuulka, waalidiinta waa in la wargeliyaa oo la siiyo taageero haddii loo baahdo, tusaale ahaan, dhexdhexaadin.

## Kormeerka iyo taageerada kadib

- Shaqaaluhu wuxuu si joogto ah ula socdaa xaaladda muddo ku filan oo uu hubinayo in ardaygu dareemayo amni iskuulka iyo safarka: Toddobaad walba bisha ugu horreysa, labadii toddobaadba mar bisha labaad, kadibna sida loo baahdo.
- Kormeerka waxaa ka masuul ah macallinka fasalka ama mas'uulka arrimaha iskuulka, haddii aan si kale loo go'aamin.
- Shaqaaluhu wuxuu qiimeeyaa baahida taageerada ee dhinacyada iyo kooxaha. Tallaabooyinka taageerada shakhsiga iyo bulshada waxaa lagu heshiiyaa adeegyada taageerada ardayda xaalad kasta. Waxaa sidoo kale la dejinayaa qorshe waxbarasho oo gaar ah haddii loo baahdo.
- Shaqaaluhu wuxuu ardayga u gudbiyaa adeegyo taageero oo ka baxsan iskuulka sida waxqabadka Ankkuri, kooxda taageerada MLL ee Selviytyjät, Tukipysäkki arrimaha cagajuglaynta.
- Haddii loo baahdo, ardayga waxaa loo qabtaa wadahadal anshaxeed ama waxaa la mariyaa tallaabo anshaxeed iyadoo la tixgelinayo da'da, heerka horumarka, xaaladda iyo cawaaqibta.
- Hawlaha waxaa la qiimeeyaa oo la horumariyaa sannad kasta iyadoo lagu salaynayo xog ururin, tusaale; Xog-ururinta ku qanacsanaanta ardayga iyo iskuulka, sahanka caafimaadka iskuulka, hagaha TEA.

!

**Rabshaddu** waxay noqon kartaa mid maskaxeed, jireed ama xadgudub ah. Rabshaddu waa adeegsiga awood, xakameyn ama xoog jireed si ula kac ah ama ku hanjabaad. Ficillada rabshaddu waxay ka dhex dhici karaan ardayda dhexdooda ama ardayga iyo shaqaalaha iskuulka dhexdooda. Cagajuglayn, xadgudub iyo takoorku waa noocyo ka mid ah rabshadda.

**Cagajuglayntu** waa dhibaateyn si joogto ah, ula kac ah loo geysto qof kale iyadoo laga dhaawacayo maskax ahaan, jireed ahaan ama bulsho ahaan. Cagajuglayn waxay sidoo kale ka dhici kartaa goobaha dijitaalka ah.

**Xadgudubku** waa dabeecad hadal ama ficil ah oo si ula kac ah loogu dhaawacayo, loogu hanjabo, loogu bahdilo ama loogu sharaf ridayo qof ama koox dad ah.

**Takoorku** wuxuu yahay in si ula kac ah qof ama koox loola dhaqmo si ka hooseysa ama loo gacan bidixeeyo marka loo barbar dhigo dadka kale, ama laga reebo fursado ay dadka kale helayaan.

**Dhammaan falalka kor ku xusan waxay noqon karaan dembi.**

## More information about early childhood education and education:
## www.jyvaskyla.fi/en/daycare-and-education

JYVÄSKYLÄ

**Hyvä kasvu kaikille -hanke**
Kasvun ja oppimisen palvelut, Jyväskylän kaupunki
**Taitto:** Kuuverstas **Valokuvat:** Anette Aittanen, Hanna-Kaisa Hämäläinen